


Baayobsi (Biopsy)

Waxa laga yaabaa in dhakhtarkaagu kugula taliyo in lagaa qaado baayobsi (cad yar oo hilib ah oo lagaa jaro) iyo dheecaan qaadis haddii aad leedahay calaamado ama astaamo gaar ah, ama haddii uu dhakhtarkaagu arkay meel/aag walaac leh.

Baayobsi waa hawlgal jidhkaaga lagaga soo qaadayo cad yar oo hilib ah, ama saambal/tijaabo unugyo ah.

Qayb kasta oo ah jidhka, sida dhuux laf, fud ama buruq, xubin jidh ama maqaar, ayaa lagu baadhi karaa baayobsi.



Qeybta jirka ee wax laga qaaday/baayobsi lagu sameeyay baayobsiga wax uma geysto.

Jirka si deg deg ah ayuu uga soo kobtaa nooyadatan ee wax qabasho sababtoo ah inta cad ee laga qaaday ayaa aad u yar.




Saambalka/la tijaabayo waxaa loo diraa shaybaadhka ama labaratoori waxana si soke loogu baadhaa weynayso ama mikroskoob si loo fiiriyo in kansar ama dhibaato kale jirto.

Baayobsi waa baadhitaan si hubaal ah u sheegi kara haddii meel/aag shakiga ku jiro uu yahay kansar. Baayobsiyada waxa kale oo loo sameeyaa si loogu cadeeyo/fiiriyo dhibaatooyinka kale ee caafimaad sida infagshanka ama bararka aan caadiga aheyn.

Waxa jira siyaabo badan oo loo sameeyo baayobsiga. Baayobsiyada qaarkood waxay u baahan yihiin qalitaan. Noocyada kale ee baayobsiyo ayaa cad ku soo qaada irbad.

Baayobsiyada qaarkood waxaa lagu sameyn karaa xafiiska dhakhtarka. Qaar kalena waxaa lagu sameeya isbitaalka.



Dhakhtarkaaga ayaa kuu sharixi doona nooca baayobsi ee lagu sameyn doono. Hubi inaad weydiisid wax kasta oo aanad fahmin.

Sida hawlgal caafimaad kasta, waxa laga yaabaa inay jiraan xoogaa halisyo/qataro iyo cilad-saa'id ah marka la qaado baayobsi. Dhakhtarkaaga wuxuu kaala hadli doonaa halisyada/qatarada dhici kara iyo ciladaha saaidka ah.

Waxey ku siineysaa riyaaq in saaxiib ama qof qoyskaaga ka mid ah kula yimaada balanta baayobsiga. Baayobsiyada qaarkood, sida kuwa u baahan suuxdin, waxaa lagu weydiin doonaa inuu kula socdo qof ku qaada.

Hawlgalada baayobsiga waxay cadka la baadhayo ka soocan cadka agagaarka goobta. Tani waxay ka hortagtaa in unugyo aan caadi ahayn ay taabtaan unugyada caadiga ah. Baayobsiga *ma laha* halis kansar fidin. Ma keento in unugyada kasarka eey fidaan ama koraan.

Iyada oo eey ku xidhan tahay nooca baayobsiga ee lagu sameynayo, waxa laga yaabaa in aanad u baahan inaad wax sameysid si aad isu diyaarisid. Ta kale, waxa laga yaabaa in lagu sheego in aanad wax cunin ka hor baadhitaanka, in aad soo diyaarsatid qof baabuur kugu geeya guriga ka dib baadhitaanka, inaad wax ka beddeshid dawooyinkaaga caadiga ah, iwm.

Waxa lagu siin doonaa dawooyin lagu xakameynayo xanuunka inta uu socdo baayobsigu. Waxa laga yaabaa in taasi noqoto suuxin goob (local anesthetic) (oo ah duris si loo kabuubyeeyo aagga ku wareegsan goobta baayobsiga laga qaadayo).

Ama, waxa laga yaabaa in lagugu xidho faleebo ama sayloon (IV) si lagu siiyo dawo xanuun iyo dawo seexin (sedative) (si lagaaga gargaaro inaad nafistid/dabacdo).


Raajo, sawir CT ama sawir “ultrasound” ayaa laga yaabaa in la sameeyo si dhakhtarkaaga looga gargaaro inuu si sax ah u helo goobta baayobsiga.



Ka dib baadhitaanka, waxa laga yaabaa inaad yeelatid dhiigroor, raaxo-daro ama barar ah goobta baayobsiga.

Dhibaatooyinkaan ma’aha in ey mudda socdaan.

Dhakhtarkaaga ayaa kala hadli doona siyaabada aad isku daryeeshid ka dib baayobsiga oo kuu qori doona dawo xanuun haddii loo baahdo.



Saambalada/tijaabada baayobsigu waxay u baahan yihiin wakhti si loo baadhdo. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona mudada ay qaadan doonto inaad heshid jawaabtaada baayobsiga.

Jawaabta baayobsgigu waxay caawineysaa sidii loo heli lahaa doorarashada daawada ku haboon. Tusaale ahaan, haddii kaansar la helo, jawaabta baayobsigu waxay sheegi kartaa nooca saxda ah. Tani waxay saamaxaysaa in adiga iyo dhakhtarkaaga aad ka wada shaqeysaan in lagu soo saaro qorshaha daweyn ee adiga kuugu fiican. Ama, waxa laga yaabaa in baayobsigu sheego nooc gaar ah oo ah caabuq ama infekshan sidaa daraadeedna uu dhakhtarkaagu dooran karo dawada ugu waxtar badan.

Weydii dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada haddii aad qabtid wax su’aalo ah oo ku saabsan baayobsigaaga.

A project by Health Roads Media and EthnoMed
This project has been funded in whole or in part with Federal funds from the Department of Health and Human Services, National Institutes of Health, National Library of Medicine, under Contract No. HHS-N-276-2011-0008-C with the University of Washington. Thank you to Safeway Foundation for its support to Harborview Medical Center’s EthnoMed for the development of cancer-related content.